

# MINNESOTA DFL



## DIFAACA CODBIXIYAHA

### Su'aalaha Badanka la Iska Waydiyo Codaynta la Heli Karo

Ikhtihaarada la Heli Karo	Faahfaahin
<b>Helitaanka/gaaritaanka goobta codaynta</b>	<p>Shuruucda gobolka iyo fadaraalku waxay dhigayaan goobaha codaynta in ay noqdaan qaar meel loogu hagaago leh. Sarkaal deegaanka ah ayaa kaliya dooran kara goobaha codaynta ee buuxiya jaangoynaha, ilaa haddayna jirin mooyaane goob ku taala degmada oo la gaari karo ama laga dhigi karo mid la gaari karo. Liis dhammaystiran oo ah jaangoynaha gaaritaanka goobaha codaynta waxa laga heli karaa <a href="#">halkan</a>.</p>
<b>Ku saxeexidda hadalka afka</b>	<p>Haddaad magacaaga saxeexi karin, waxaad xaq u leedahay inaad magacaaga afka ka sheegto oo aad qof kale ka codsato inuu kuu saxeexo.</p>
<b>Kaalmada dadka kale ka imaanaysa</b>	<p>Codbixiye kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu cid waydiisto caawimo, marka laga reebo wakiilka loo-shaqeeyahaaga ama ururkaaga shaqaalaha.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>- Waxaad keeni kartaa xubin qoyskaaga ah, saaxiib, jaar ama cid aad doonayso inay kaa caawiso codaynta.</li> <li>- Sidoo kale waxaad dalban kartaa xaakin doorasho goobta doorashada si uu kuu kaalmeeyo.</li> </ul> <p>Qofka ku caawinayaa wuxuu kaa caawin karaa dhammaan qaybaha nidaamka codaynta, sida waabka codaynta. Waxaad si hoose u tusi kartaa waraaqdaada codaynta xaakin doorasho si uu u hubiyo inaad si sax ah u calaamadisay. Caawiyayaasha looma oggola inay saamayn ku yeeshaan codkaaga ama kuu sheegaan sida aad ugu codaynayso dadka kale.</p>
<b>Mishiinada codaynta la heli karo</b>	<ul style="list-style-type: none"> <li>- Goobaha codaynta intooda badani waxay leeyihiin mishiinka codaynta waraaqda codaynta oo kuu calaamadin kara waraaqdaada. Waxaad ka helaysaa xil qaris haddii aanad (ama aad doorato inaadn) codayn adigoo qallin-biiroo isticmaalaya. Mishiinku wuxuu leeyahay shaashad muujisa waraaqda codaynta oo far waawayn ku qoran ama muuqaalkeedu aad u muuqdo. Sidoo kale wuxuu kuu akhriyi karaa waraaqda codaynta adoo ka dhagaysanaya sameecadaha dhagaha. Waxaad buuxin kartaa waraaqdaada codaynta adigoo isticmaalaya kiibaadhka Indhoolayaasha, shaashadda la salaaxo ama aaladda nuugida iyo buufinta. Kadib markaad doorashadaada samayso, wuxuu daabacaya waraaqdaada codaynta oo buuxsan.</li> </ul>

	<ul style="list-style-type: none"> <li>- Marka laga reebo doorashooyinka xaafadaha goonida u taagan ee xaafadaha ay wax ka yar 500 oo codbixiye ka diiwaangashan yihiin, mishiinada waraaqda codaynta calaamadiya waxa waajib ah inay yaalaan goob codayn oo kasta.</li> </ul>
<b>Codaynta Adoo Gaariga Saaran</b>	Haddii aanad si fudud uga bixi karin gaarigaaga ama aanad rabin sidaas, waxaad dalban kartaa in waraaqda codaynta lagu keeno. Sidan waxa loo yaqaan 'codaynta adigoo gaariga saaran.' Laba xaakin doorasho oo ka socda xisbiyada waawayn ayaa waraaqda codaynta kuu keeni doona. Markaad codaynta dhammayso, xaakinada doorashadu waxay keeni doonaan waraaqdaada codaynta gudaha waxayna ku ridi sanduuqa waraaqaha codaynta.
<b>Codaynta iyadoo lagaa masuul yahay</b>	<b>Waxaad xaq u leedahay inaad codayso haddii aad ku jirto xaalad lagaa masuul yahay, ilaa uu xaakin ka laabto xaq aad u leedahay codaynta mooyiye.</b>
<b>Baddalka waraaqaha codaynta</b>	Waxaad xaq u leedahay baddalka waraaqda codaynta haddii aad qalad ku samayso waraaqdaada codaynta kahor inta aadan dhiiban codka.
<b>Ku codaynta boostada</b>	<p>Foomka dalabka waraaqda codaynta ee maqanaha waxa la heli karaa isagoo qaabab badan ah.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>- <a href="#">Dalabka waraaqda codaynta maqanaha ee onlaynka ah</a></li> <li>- <a href="#">Dalabka waraaqda codaynta maqanaha ee la soo dejiisan karo oo ku qoran Ingiriisi, Isbaanish, Hmong &amp; Soomaali</a></li> </ul> <p>Si aad u codsato dalab ah qaab kale sida Farta Indhoolka, fadlan soo wac 1-877-600-8683</p> <p>Xaaladaha qaar, waxaad waydiisan kartaa wakiil inuu kuu keeno oo haddana celiyo waraaqda codaynta maqanaha. Kan waxa loo yaqaan 'keenista wakiilka.'</p>
<b>Keenista Wakiilka</b>	<p>Si aad ugu qalanto wakiil keenista, waxa waajib kugu ah inaad:</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>- Degan tahay guryaha xannaanada</li> <li>- Xarun dadku kaalmo u baahan yihiin</li> <li>- Xarun guriga daawaynta</li> <li>- Guryaha dadka isku baahi qabaa degan yihiin</li> <li>- Gabbaadka haweenka ka baxsada xadgudubka guriga</li> <li>- Isbitaal aad taallo ama aadan awoodin inaad aaddo meesha laga codaynayo sababtuna tahay awood la'aan caafimaad ama naafonimo.</li> </ul> <ul style="list-style-type: none"> <li>- Waxa waajib ah inaad buuxiso codsiga foomka <a href="#">kwakiil keenista ee waraaqda codaynta maqanaha</a>. U dhiib wakiilkaaga foomkaas iyo dalabka waraaqdaada codaynta maqanaha. Ha geeyo wakiilkaagu labadan foomba xafiiska doorashada deegaanka si loo helo waraaqdaada codaynta.</li> </ul>

**Macluumaad Dheeraad Ah:**

<https://dfl.org/voterprotection/> | <https://dfl.org/> | | <https://mnvotes.gov>

	<p>- <b>Wakiilkaagu waxa waajib ah inuu yahay ugu yaraan 18 jir, inuu kula leeyahay xiriir hore u jiray oo aanu noqon karin murashax.</b> Qofku ma noqon karo wakiilka in ka badan saddex codbixiye hal doorasho. Wakiilkaagu wuxuu kuu soo qaadi karaa waraaqdaada codaynta laga bilaabo toddoba maalmood kahor maalinta doorashada ilaa 2 galabnimo. Maalinta Doorashada. Wakiilkaaga ama cid kale oo aad wakiilato ayey waajib tahay inay ku soo celiso waraaqdaada codaynta isla xafiiska doorashooyinka ugu dambayn 3 galabnimo. Maalinta Doorashada. Sidoo kale waxaad ku soo celin kartaa boostada waraaqdaada codaynta. Saraakiisa doorashadu waxa waajib ah inay helaan waraaqdaada codaynta Maalinta Doorashada ama kahor.</p>
--	--

**Macluumaad Dheeraad Ah:**

<https://dfi.org/voterprotection/> | <https://dfi.org/> | | <https://mnvotes.gov>



**Macluumaad Dheeraad Ah:**

<https://dfi.org/voterprotection/> | <https://dfi.org/> | | <https://mnvotes.gov>